

War saxaafadeed 15 Maarso 2019

Ololaha amaanka internetka ee cusub si uu u caawiyo bilaabida sheekada

Maanta, oo ah Maalinta Ficilka Qaranka ee looga soo horjeedo Xoog u sheegashada iyo Qalalaasaha, olole cusub ayaa la qaaday si loogu caawiyo waalidiinta, xannaaneeyayaasha iyo macalimiinta si ay u bilaabaan sheekada ku saabsan amaanka internetka.

Cilmi baaris ayaa muujineysa in carruur badan oo Australiyaan ahi marka loo eego weligeed ay waxyaalo xun kala kulmayaan internetka, oo ay ka mid tahay xoog ugu sheegashada internetka, xiriir aan la dooneynin oo ka imanaya dad ku cusub iyo bulsho ka saarida.

Ololaha qaranku wuxuu u qasdayaa inuu ku hubeeyo waalidiinta macluumaadka saxda ah si uu uga caawiyo in carruurta iyo dhalinyarada amaanka internetkooda la ilaaliyo.

“Cilmi baaristeenoo waxay muujineysaa boqolkiiba 81 waalidiintu waxay siiyeen carruurtooda isticmaalka qalab internetka ku xiran, saa daraadeed la furida wadahadal daacad ah oo ku saabsan dabeecada internetka amaanka ah ayaa u baahan inay hore uga bilaabanto guriga oo aan ahayn sida dadka badidiis u maleynayaan,” waxaa yiri Guddoomiyaha eSafety, Julie Inman Grant.

“Tignoolajiyada oo si aad ah u dheeraysa isuna bedelaysa, waa muhiim in waalidiinta, macalimiinta iyo dhammaan kuwa daryeela carrurta ay yihiin kuwo ku qalabeysan macluumaad cusub, sax ah oo sahlan in la raaco. Sidaan waxaan dhammaanteen hubineynaa inay carruurta helaan isticmaal internet wanaagsan oo amaan ah, waxaa tiri Inman Grant.

Ilaha macluumaadka ee kala duwan lagana helayo [website](#) ka eSafety, waalidiinta, xannaaneeyayaasha iyo macalimiinta waxay ka heli karaan macluumaad ku saabsan kiisaska qaarkood ee – dareen maskaxeed, shakhsiyeed – cawaaqibka sharciyeed ee dabeecada internetka.

“Maanta, Maalinta Ficilka Qaranka ee ka soo Horjeeda Qalalaasaha iyo Xoog u sheegashada, mid ka mid ah siyaalaha ugu wanaagsan ee aan talaabo u qaadi karno waa inaan la bilownaa wada sheekeysii Ilmaheena,” waxaa yiri Inman Grant.

In ka badan laba milyan oo ardey ah oo ka socda in ka badan 5000 oo dugsi oo Australia oo dhan ah ayaa leh ‘Xoog u sheegashada. Sina Ma aha’ ka qayb ahaan Maalinta Ficilka Qaranka ee ka soo horjeeda Qalalaasaha iyo Xoog u sheegashada.

Maalinta ficil sannadeed Qaranka ee sagaalaad waxay ku dhiirigelinaysaa ardeyda, macalimiinta iyo waalidiint inay ka hor istaagaan qalalaasaha iyo xoog sheegashada dugsiyadeena dhexdeeda ah.

“Xoog sheegashada internetka waxay qaadan kartaa qaabab badan oo ay ka mid yihiin magac ugu yeerida, fariimo aan la dooneynin, iyo sidoo kale hanjabaado iyo waxyaalo la soo geliyo ka raali ahaansho la’aan – iyo maanta waxaan direynaa fariin xoog badan oo ah inaysan weligeedba wax la ogol yahay ahayn,” waxaa tiri Inman Grant.

eSafety waxay martigelinayaan [virtual classrooms](#) oo bilaash ah loogna talagalay dugsiyada dalkoo dhan si ay uga caawiso inay awood siiso ardeyda iyo maclimiinta iyadoo la adeegsanayo istiraatiijiyado ficil ah si looga hortago, maareeyo iyo la soo sheego u xoog sheegashada internetka ah.

In ka badan 320,000 arday ayaa ka qaybqaatay fasaladaan laga soo bilaabo 2015.

Waalidiinta, xannaaneeyayaasha, maclimiinta iyo kuwa kale waxay heli karaan macluumaad intaa ka sii badan esafety.gov.au.

Wixii macluumaad dheeraad ah ama inaad balansato wareysi, fadlan kala xiriir:
Paula Masselos, Embrace Society 02 8090 7737 iyo 0419 292 207
ama paula@embracesociety.com.au